# Su'aalaha Ku Saabsan Dhaxalka

Questions About Probate

## Waa maxay dhaxalku?

Geeridaada ka dib, "dhaxalkaaga" waa in la maareeyaa. Dhaxalku waa lacagta iyo hantida aad leedahay iyo deynta lagugu leeyahay.Haddii hantida dhaxalkaaga ahí ay ka badan tahay $75,000 ama haddii aad leedahay guri maxkamada dhaxalka in la aado waa lama huraan. Waa lama huraan xataa haddii aad leedahay dardaaran.

Maxkamadda dhageysata dhaxalka ayaa magacawda "qof wakiilka ah" si u maareeyo dhaxalka. Waxa aad ku magacaabi kartaa dhaxalka Qof Wakiil Kaa Ah, laakiin waa in ay weli maxkamaddu ogolaataa. Wakiilka shakhsiyanka ah waxaa marmarka qaarkood loogu yeeraa fuliye.



Wakiilkaaga Shaqsiyanka ah ayaa sameeya liis ah dhamaan lacagta iyo hantida dhaxalka ah iyo wixii deyn ah. Qofka Wakiilka kaa ah ayaa bixiya deymaha, oo qeybiya wax kasta oo ka soo haray dhaxalkaaga.

Haddii aad leedahay dardaaran, waa inuu dardaarankaasi yiraa sidda aad doonayso in lacagtaada iyo hantidaadda loo qaybiyo.  Haddii aadan qorin dardaaran, taas waxaa lagu magacaabaa "qof aan dardaaran ka tagin (intestacy)" oo sharciga gobolku waxa uu leeyahay nidaamyo ku saabsan cidda heli lacagtaada iyo hantidaadda. Xataa la'aanta dardaaran, lacagtaadda iyo hantidaaddu waxaa la siin xigtadaadda aan ka ahayn inaadan lahayn qaraabo nool. Xaaladaas marka ay dhacdo "gobolka ayaa la wareegaya." Akhri xogta urursan ee *Su'aalaha Inta Badan La iska Waydiiyo Dardaaranka*.

Maxkamadda dhaxalka waxaa kale oo loo adeegsadaa marka uu muran ku dhex jiro qoyska oo ku saabsan dardaaranka ama loo baahdo amarka qaali si hantida loo qeybiyo.

## Lacagta iyo Dhaxalku

Lacagta hawlgabka ama hanti kale oo aad ku qortay qof kale oo manfacle ahi inuu helo kuma jiraan xadka cadadka $75,000 ka ah. Dhaxal helahu waa qof aad ku magacowday lacag akoon ku jirta ama hanti maguurta ah inuu helo hantidaa kolka aad geeriyooto. Hantida ma guurtada ah macnaheedu waa dhulka dhisan iyo dhulka banaan. Haddii hantida ma guurtada ah uu magacaaga kaliya ku qoran yahay aana manfacleyaal lagu qorin diiwaanada dowladda, kolkaa maxkamad dhaxal in la tago waa lama huraan.

## Hantida Ma Guurtada Ah iyo Dhaxalka

Haddii aad tahay mulkiilaha kaligii leh hanti ma guuro ah kolka aad geeriyooto, aadana ka xareyn Wareejinta Mulkiyadda Hantida Geerida ka dib [Transfer on Death Deed (TODD)] maxkamadda degmadda, maxkamada dhaxalka ayaa loo baahan doonaa kolkaa. Xataa haddii hantidaadda qiimaheedu uu ka yar yahay $75,000. Wakiilka shaqsiyanka ahi waxa ku qoraa hantidda dhaxal sugayaashaada ama waxa uu gadaa hantidda ka dibna qaybiyaa lacagta soo baxda.

Eeg xogta aruursan ee *Wareejinta Hantida Geerida Ka Dib*

## Maxaa loola jeedaa ka maaranka “qeybinta dhaxalka”?

‘Ka maarmida maxkamada dhaxalka’ macnaheedu waa dhaxal sugayaashaada khasab kuma aha inay tagaan maxkamada dhaxalka si loogu soo wareejiyo iyaga hantidaada. Tusaale ahaan, Haddii aad wada jir u wada leedihiin akoon bangi qof kale, ama aad ula la leedahay dhul qof kale si “wadaag ah oo kale.” Kolka aad dhimato, qofkaa ayaa markiiba iska yeelanaya akoonkaa ama dhulka. Wax amar maxkamadeed ah looma baahanayo, kolkaa aadidii maxkamada dhaxalka waa laga maarmayaa. Qaar ka mid ah xoolo meel dhigidaha, hadiyadaha la sameeyey ka hor geerida iyo caymiska noloshada ayaa dhamaantooda ah jidadka lagaga maarmi karo maxkamada dhaxalka. Waxaad sidoo kale magacaabi kartaa manfaclayaal hantidaada la ‘Siinayo Kolka Geerida (POD)’ sida akoonada bangiyada ama maalgelino kale. Kolkaa hantidaada waxaa markiiba qaadanaya manfaclayaashaa la’aanta maxkamad dhaxal. Kala hadal bangigaaga u magacaabida manfaclayaal (POD) akoonada bangigaaga.



Manfaclayaal waa loo magacaabi karaa hantida ma guurtada ah iyagana. Jid looga maaro maxkmada dhaxalka inay gasho hantida ma guurtada ah waa in si quman loo

saxiixo lagana diiwaan geliyo Wareejinta Mulkiga Hantida Geerida ka hor. Helaha (TODD) Hantidaada Geerida ka dibna waxa uu noqon manfaclahaaga. Waxaana la siin mulkiga hantida geeridaada ka dib kolkaa maxkamada dhaxalka looma baahanayo inay wareejiso hantida ma guurtada ah. Eeg xogta aruursan ee *Wareejinta Hantida Geerida Ka Dib*.

Ma aha sida ugu wanaagsan ee looga maarmo maxkamadda dhaxalka. Maxkamadaha dhaxalka laguma bixiyo wax lacag ah mana qaataan muddo dheer haddii aysan aheyn hanti fara badan iyo arrimo adag, ama dadka dhaxalka leh aanay isku qabqabsan. Mararka qaarkood maxkamadda oo laga dheeraado waxa ay keentaa dhibaato badan.

Dardaaran wanaagsan waxa uu ka hortagaa dagaal la isku qabsado hantida maxkamadda dhaxalka.

## Maka maarmi karaa maxkamadda dhaxalka haddii uu jiro dardaaran?

Dardaaran aad qorto markasta kagama maarmi kartid maxkamadda dhaxalka. Waxa ay ku xiran tahay nooca hantida aad leedahay, imisa ayaa qiimaheedu yahay, haddii aad kaligaa mulkiyadda leedahay ama qof kale kula wadaago iyo cidda aad dooneyso in aad siiso. Sidda kor lagu sharxay:

- hadii aad leedahay hanti ma guurto ah (la'aanta TODD) ama
- ay hantidaaddu ka badan $75,000 (la'aanta POD)


lahaanshaha dardaaranku ma bedeli doonto xaqiiqda ah in dhaxalkaagu uu wali u baahnaan doono maxkamada dhaxalada inay gasho.

Haddii ay qoysku aanay ku raacsaneyn dardaaranka, sida loo maamulay dhaxalka, waxa ay ka hor iman karaan dardaaranka ka dibna Maxkamadda Dhaxalka ayaa go'aan ka gaarta hantida. Waxaa kale oo maxkamadda loo baahanayaa haddii uusan jirin dardaaran, ama aanu qoysku isku raacsaneyn sida loo maareeyey dhaxalka.

## Maxaa dhacaya haddii dhaxalku yahay mid yar?

Haddii dhaxalka qiimihiisu ka yar yahay $75,000, dadka leh dhaxalka ayaa qaadan kara hantidaada gaarka ah iyaga oo aan maxkamad tagin iyaga oo isticmaalaya "Maragkaca Ururinta Hantida Qof Ahaaneed (Affidavit for Collection of Personal Property)."

Waxa aad [ka heli kartaa foomkan ]maxkamadda ama aad ka heli kartaa barta internetka ee [www.mncourts.gov](http://www.mncourts.gov). *(ingiriisi kaliya)*



→ Guji “Forms & Instructions” *(Foomamka)*
→ Guji “Probate” *(Dhaxalka)*
→ Guji “Affidavit for Collection of Personal Property (Small Estate - No Real Estate)” *(Maragkaca Ururinta Hantida Qof Ahaaneed)*

Hantida qof ahaaneed oo ay ka mid tahay xisaabaha bangiga, deymaha, warqadaha lacagta (stocks) iyo qalabka guryaha iyo alaabada kale, laakiin aan hayen guriga aad degan tahay iyo hantida ma guurtada ah.

Dhaxal suge, ama qof kale oo lagu magacaabay dardaaranka ayaa tusi kara warqad Dhaarta (Affidavit) bangigaaga ama cidii kale ee haysa hantidaada, ka dibna waydiisan kara inay ku wareejiyaan hantidaadda isaga.

Kuwa leh dhaxalka waa in ay maragkaca, koobi la soo shaabadeeyey ee shaahaadada geerida u keenaan bangiga ama qofka hantida haya. Taas waxaa la sameyn karaa 30 cisho gudahood laga soo bilaabo taariikhda geerida.

## Ma la iga doonayaa in aan magaca ilmaha ku daro mulkiyadda hantida ama xisaabta?

Arrintan si taxadar leh uga fikir. Tani waxa ay abuuri kartaa dhibaato adiga oo nool. Dhaxalku uma xuma sida ay dadku u maleynayaan. Waxa ay u maleynayaan in lacag badan kaga baxeyso oo ka badan lacagta ku baxda.

Tusaaale ahaan:
Haddii aad dooneyso in aad iibiso guriga oo dhan ama aad dooneyso in aad deyn ku qaadato, waa in qofka aad ku dartay ogolaadaa. Haddii aanay ogoleyn ma iibin kartid. Waxa kale oo laga yaabaa in ay ka iibiyaan qeybta ay ku leeyihiin hantida qof kale kamana joojin kartid.



Haddii aad ku qorto magaca qof kale xisaabtaada bangiga, qofkaas kale qeyb ayuu ku yeelanayaa. Qofkaas waxa uu ku leeyahay xuquuq la mid ah tan aad ku leedahay lacagta xisaabta, wayna qaadan karaan.

Sidoo kale, haddii ay tahay lacag fara badan, waxaa suurogal ah in aad canshuur ka bixiso.

**Ogow:** haddii aad ku qorto qof kale macagii akoonkaaga, qofkaa waxaa dhici karta inuusan helin nacfiyo dowladdu bixiso waayo waxa ay ekaan in lacagtaada oo dhani ay tahay sidoo kale lacag uu isagu yahay.

La tasho qareen inta aadan qof kale ku darin magaca xisaabta ama hantida, xataa hadii uu qofku yahay ilmo aad adigu dhashay.

## Isku dayga inaan ka maarmo maxkamadda dhaxalka saameyn ma ku yeelaneysaa in la i siiyo MA?

Maalin ayaa laga yaabaa in aad u baahato Ceymiska Caafimaadka gobolka (MA) si ay kaaga caawiyaan biilasha caafimaadka ama kalkaaliyaasha caafimaadka ee guriga. MA waxa ay xad u goysay dakhliga iyo hantida qofku lahaan karo. MA waxa ay leedahay sharciyo u degsan in qofku hantidiisa bixiyo si qofku u helo MA.

Kolka aad codsato, waa khasab inaad u sheegto MA ga wixii hanti ah ee aad bixisay, aad meel dhigtay, ama aad ku gaday qiimo ka yar qiimahooda buuxa 5 tii sanno ee la soo dhaafay. Ku qorida qof kale magacii gurigaaga ama akoonka bangigaaga **waa** wareeejin hanti. Waxa ay kuu diidi kartaa taasi helida caawimaada MA kolka aad u baahato. Kala hadal qareen yaqaan arrimaha wareejinta hantida iyo MA ka hor inta aadan wareejin wax hanti ah.



***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**